



Nagala soo qaybgal kulanka bulsheed si aan uga wada hadalno sida PPS ay ugu adeegsaneyso maalgalinta Sharciga Guusha Ardayga

Iyada oo iskuulada guud ee Oregon ay ka heli doonaan maalgelinta weyn ee gobolka, Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland waxay bilaabi doonaan shirar isdaba joog ah oo bulshada, kaas oo qoysaska, ardayda iyo xubnaha bulshada ay naga caawin doonaan qaabeynta sida lacagta loo adeegsado Sharciga Guusha Ardayga. ee degmada.

Fadlan qorsheyso inaad ka soo qeybgashid mid ka mid ah kulamada soo socda si aad u soo bandhigtid ra'yi-celintaada oo aad weydiiso wixii su'aalo ku saabsan qorshayaasha PPS ee maalgelinta Sharciga Guusha Ardayga:

- Khamiis, Oktoobar 17, 6 p.m., Dugsiga Lent K-8 (5105 SE 97th Ave.)
- Sabti, Oktoobar 19, 9 a.m., Dugsiga Faubion PK-8 (2930 NE Dekum St.)
- Talaado, Oktoobar 22, 6 p.m., Dugsiga Sare ee Roosevelt (6941 N. Central St.)
- Khamiista, Oktoobar 24 saacada 6:00 fiidnimo, Dugsiga Benson Polytechnic High School (546 NE 12th Ave.)

Sharciga Guusha Ardaygu wuxuu asal ahaan ka yimid [House Bill 3427](#) waxaana sharciga u saxiixay Gov. Kate Brown. Waxay bixisaa maalgalin \$ 2 billion ah oo taariikhi ah nidaamka waxbarashada ka hor-K-12 ee gobolka.

"Tani waa guul weyn oo taariikhi u ah waxbarashada dadweynaha guud ahaan iyo Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland gaar ahaan, "Kormeeraha Guud ee PPS Guadalupe Guerrero ayaa u qoray [wargad bulshada](#). "Shaqadeenu waxay hadda ka bilaabaysaa inay dejiso qorshe ku saabsan sida aan ugu adeegsan doonno qaybteenna ah maalgelinta dheeriga ah, laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2020 -21, siyaabo wanaajin doona waayo-aragnimada waxbarasho ee dhammaan bartayaasha kala duwan."

Soo-galinta maalgalintu waxay ka caawin doontaa PPS inay bilawdo shaqada wax ka beddelka si ay u fuliso himilada muddada fog ee degmada lagu aqoonsaday iyada oo loo marayo geedi socod Himilo Bulsho oo ku saleysan bulshada. Himilada PPS ([agri dukumiintiga Himilada oo dhameystiran](#)) wuxuu sharraxayaa himilooyinkeena fasalka qalin-jabinta ee 2030, iyo khibradda waxbarasho ee si isa soo taraysa u noqon doonta runtii mid kastoo ka mid ah qalin-jabiyadeena sannadka 2019.

Sida loo qoondeeyo Sharciga Guusha Ardayga

Akoontiga Maalgashiga Ardayda, 50%: Sharciga Guusha Ardaygu wuxuu ugu deeqayaa kalabar maalgelintiisa Akoonka Maalgashiga Ardayda ee dhowaan la aasaasay kaas oo loo qaybin doono sida deeq-tartan lahayn dhammaan degmooyinka Oregon iyo iskuullada charterka ah ee xaq u qalma. Degmooyinka ayaa loo oggol yahay inay ku maalgeliyaan lacagtaas wax ka qabashada cabirka fasalka, bixinta waxbarasho si habsami leh u socota, waqtiga wax dhigista, iyo caafimaadka iyo amniga. Afarta qaybood ee maal gashiga, degmooyinka waxay leeyihiin shanta aag ee mudnaanta leh:

- Yaraynta farqiga u dhexeeya ardayda ee ah midabbada; naafo ah; ku soo baxa laba luqadood; haleeshay saboolnimada, hoy la'aan ah iyo daryeelka korinta; ama qabo taariikh ahaan lana kulmay ka duanaansho iskuulada ah
- Buuxinta baahida caafimaadka maskaxda iyo dhaqanka ardayda
- Bixinta helitaanka koorsooyin waxbarasho
- U oggolaanshaha macallimiinta iyo shaqaaluhu inay helaan wakhti ku filan oo ay ku wada shaqeeyaan, dib ugu eegaan macluumaadka ayna ku horumariyaan istiraatiijiyado looga caawiyo ardayda inay ku sii socdaan wadada qalin jebinta
- Samaynta iyo xoojinta iskaashiga

Akoontiga Mashaariicda Waxbarashada Gobolka oo dhan, 30%: U heellan balaarinta barnaamijyada quraacda iyo qadada dugsiga, ka shaqeynta nidaamka dib uga-hawlgelinta dhalinyarada, sameynta Nidaamka Badbaadada Dugsiga iyo Nidaamka Kahortaga, horumarinta barnaamijyada sinnaanta gobolka oo dhan, bixinta barnaamijyo waxbarasho xagaaga ah ee loogu tala galay iskuulada qaarkood iyo maalgelin buuxda oo lagu cabiro 98 (oo siisa maaliyad toos ah dugsiyada degmooyinka si kor loogu qaado heerarka qalinjabinta dugsiga sare).

Akoontiga Waxbarashada Hore, 20%: U heellan waxbarashada gaarka ah ee ilmanimada hore iyo adeegyada wax ka qabashada hore, xanaanooyinka gargaarka, horumarinta xirfadaha, barnaamijyada Head Start, iyo kuwo kale. Deeqaha waxaa loogu talagalay in lagu kobciyo awoodda ururada dhaqan ahaan u gaarka ah iyo yareynta farqiga u dhexeeya barnaamijka ilmanimada hore

Qaababka kale ee ra'yi celinta

Shirarka bulshada waxaa sii dheer, xubnaha dadweynuhu waxay awood u yeelan doonaan inay jawaab-celin ka bixiyaan foomka khadka tooska ah ee dhowaan laga heli doono

www.pps.net/studentuccessact.